


Liiska Hubinta Imtixaan Qaadista Meesha Fog La joogo ee Qoyska ee Qiimeynta Gobolka Oregon oo dhan ayaa kaa caawin doona in aad fahanto waxa aad kari karto iyo waxa aadan kari doonin ka hor ama inta lagu jiro qaato imtixaan qaadista meesha fog la joogo. Wuxuu sidoo kale sheegi doonaa waxa aad ka filan karto isticmaalka imtixaan qaadashada meesha fog la joogo.

Ardayda dhigata fasallada 3aad – 8aad iyo 11aad ee ka tirsan dugsiyada dadweynaha ee Oregon ayaa laga yaabaa in ay hadda ku qaataan Qiimeyn Wadareedka Gobolka Oregon oo dhan (sida ELA, Xisaabta, iyo Sayniska) iyaga oo jooga meel fog ‘remotely’. Ardayda dhigata K – 12 qaarkood ayaa sidoo kale kaga qayb qaadan doona Qiimeynta Aqoonta Luqadda Ingiriisiga (ELPA) ee Oregon iyaga oo jooga meel fog ‘remotely’. Intaa waxa u dheer, in Oregon siiso ardayda fasallada 3 – 12 fursad ay iyaga oo jooga meel fog kaga qayb qaataan Ra’yi-ururinta SEED si ay u bixiyaan jawaab celin ku saabsan khibradooda waxbarasho. Qiimayn Wadareedka ayaa u oggolaata ardayda in ay muujiyaan fahamkooda xirfadaha iyo aqoonta ee la xiriiira maaddada. Natiijooyinku waxay siinaysaa macallimiinta macluumaad dheeraad ah oo loogu talagalay qorsheynta mustaqbalka iyo taageerada ardayga. **Si loo hubiyo in natiijooyinku ay muujinayaan waxa ilmahaagu yaqaano ee uu qaban karo, waa muhiim in ilmahaagu dhammeystiro imtixaanka(ada).**

Waa muhiim in adiga iyo ilmahaaguba aad raacdaan tilmaamahan si natiijooyinku imtixaanku ay macno muhiim ah ugu lahaadaan qorsheynta mustaqbalka.


Fadlan dib u eeg liiskani hubinta si aad isugu diyaariso imtixaan qaadashada meesha fog la joogo.

Ka hor imtixaan qaadashada

LA SAMEYNAYO	AAN LA SAMEYNIN
<input type="checkbox"/> Isticmaal aaladda imtixaanka la bixiyay ama uu ansixiyay dugsiyada ee loogu talagalay ilmahaaga. Waa inay lahaataa astaanta Browser-ka Sugan ama nidaamka app-ka oo la rakibay. 	
<input type="checkbox"/> Kala shaqee macallinka ilmahaaga si loo hubiyo in kuwan soo socdaa laga heli karo aaladda imtixaanka ardayga si ay u taageeraan isgaarsiinta: webcam-ka, makarafoon, iyo sameecad. Adiga iyo macallinku ayaa hubin kara idinka oo isticmaalaya Nidaamka Ogaanshaha: https://demo.tds.cambiumast.com/systemdiagnostic/pages/default.aspx?c=Cambium	
<input type="checkbox"/> Kala shaqee macallinka ardayga haddii ilmahaagu u baahan yahay tiknoolajiyada la adeegsado (tusaale, sida software-ka qoraalka u beddela hadalka, shaashad akhriye).	
<input type="checkbox"/> (Waa ikhtiyaari) Kala shaqee macallinka si aad u ballan ugu qabsato ku tababarashada imtixaanka ee meesha fog la joogo oo loogu talagalay ilmahaaga adiga oo isticmaalaya ka gelitaanka ardaygooga ‘log-in’ ee (barta ku tababarashada imtixaank) .	
<input type="checkbox"/> Dib u eeg Liiska Hubinta Imtixaan Qaadista Meesha Fog La joogo ee Waalidka/Mas’uulka iyada oo lala eegayo ilmahaaga.	<input type="checkbox"/> Nuqul ka sameynta, sawiritaanka, ama la wadaagista su’aalo ama jawaabo kasta imtixaanka ee dadka kale lama oggola.
<input type="checkbox"/> Hel meel aan shanqar yar leh oo ilmahaagu ku qaato imtixaanka.	<input type="checkbox"/> Ha yeelan buuq/dhawaq gadaal ka baxaya ama waxyaabo ka jeediya (tusaale, telefishinka ama muusiga) oo yaala isla qolka imtixaan qaadashadu ka socoto.

Haddii uu ilmahaagu u la kulmo dhibaatooyin internet ama tiknoolajiyadeed ama uu ka baxo imtixaanka sabab kastaba ha ahaatee, jawaabahiisa si toos ah loo keydinayaa. Wuxuu dib ugu soo gali karaa goobta si ay u dhammeysto imtixaan qaadashada meesha fog la joogo isaga oo isticmaalaya macluumaadkiisa gelitaank ‘login’ ee ugu horeeyay markuu macallinku qabto jadwalka kulanka imtixaan qaadashada xiga. Marka ardaydu ku soo noqdaan imtixaanka, waxay ka bilaabi halkii ay ku joojiyeen imtixaanka.

Inta lagu jiro Imtixaanka

LA SAMEYNAYO	AAN LA SAMEYNIN
<input type="checkbox"/> Si bilaabo, ilmahaagu wuxuu isticmaali doonaa astaanta Browser-ka Sugaan icon ee ku taal kambiyuutarkiisa si u bilaabo imtixaan qaadashada meesha fog la joogo. 	
<input type="checkbox"/> Ilmahaagu wuxuu ku geli doona 'log in' imtixaankiisa isaga oo isticmaalaya magaciisa hore, SSID gobolkiisa (Aqoonsiga Ardayga) iyo Aqoonsiga Kulanka (oo uu bixiyay imtixaan qaaduhu/kormeeruhu ka hor ama wakhtiga imtixaanka.)	
<input type="checkbox"/> Hubi in sameecada ama, sameecada dhegaha shaqeynayso oo ay cod dheeridu ku filan tahay ilmahaaga in uu maqlo tilmaamaha imtixaanka.	<input type="checkbox"/> Ilmahaaga looma oggola in uu isticmaalo telefoonka casriga ah, telefoonka gacanta, aalad gacanta lagu haysto, qaamuuska, thesaurus, ama higgad saxaha, ama naxwe hubiyaha oo ku jira aalad gooni ah inta lagu jiro imtixaanka.
<input type="checkbox"/> Ilmahaaga waxaa loo tilmaami doonaa in uu fiiriyo kaamarada, webcam-ka, makarafoonka, iyo sameecada si loo hubiyo in ay shaqeynayaan ka hor inta aanu bilaabin imtixaanka. Kaamarada, webcam-ka, makarafoonka, iyo sameecadu waa in ay si joogto ah u daarnaadaan inta lagu jiro kulanka imtixaanka oo dhan ee loogu talagalay in si toos ah loola xiriiro imtixaan qaadaha/kormeeraha, haddii kale wuxuu kaliya marin u heli doonaa imtixaan qaadaha oo la adeegsanyo doorashada wada sheekaysiga oo kaliya.	
<input type="checkbox"/> Ilmahaagu waa in uu raaca dhammaan tilmaamaha u ka helo imtixaan qaadaha/kormeeraha bixinaya imtixaanka. Haddii u ilmahaagu u baahan yahay in laga caawiyo fahamka sida loo galo 'log in' imtixaanka, waxaad isaga ka caawin kartaa oo kaliya nidaamka loo soo galo 'log in'.	<input type="checkbox"/> Marka uu imtixaanku bilaabmo adigu ilmahaaga kama caawin kartid su'aalo kasta. Ku dhiirigeli in uu isku dayo intii karaankiisa ah. <input type="checkbox"/> Ilmahaagu waa in aanu tusin shaashadiisa, ama kala sheekaysan 'chat' ama kala hadlin cidna wax ku saabsan su'aalaha imtixaanka ama qaybo kale oo ka mid ah imtixaanka. Ardaygu waxa kaliya ee u la hadli karaa imtixaan qaadaha/kormeeraha bixinaya imtixaanka. <input type="checkbox"/> Ilmahaaga looma oggola in uu isticmaalo telefoonka casriga ah, telefoonka gacanta, aalad gacanta lagu haysto, qaamuuska, thesaurus, ama higgad saxaha, ama naxwe hubiyaha oo ku jira aalad gooni ah inta lagu jiro imtixaanka.
<input type="checkbox"/> Haddii ilmahaagu u baahdo bririf ama qabo su'aal, wuxuu imtixaan qaadaha/kormeeraha kula socodsiin karaa muuqaal ahaan 'virtually' isaga oo fartiisa taagaya ama farriin ugu soo diraya qaabka wada sheekaysiga 'chat feature'.	
<input type="checkbox"/> Ardayda ayaa dib ugu laaban karta jawaabhooda ka hor inta aanay soo gudbin. Si uu u soo gudbiyo imtixaan, ilmahaagu waa in uu xushaa End Test .	